Seattle Department of Education & Early Learning

brightspark early learning services

# Su'aalaha Badanaa La-iswaydiiyo

**Bayaanka Qarsooninimada**
Sida ku xusan Sharciyada Diiwaanka Dadweynaha ee Washington (Washington Public Records Act), Macluumaadka shakhsiga ah ee lagu geliyo codsigan wuxuu hoos imanayaa Sharciga Diiwaannada Dadweynaha ee Gobolka Washington (Washington Public Records Act), waxaana laga yaabaa in sharci ahaan loo shaaciyo qof saddexaad oo codsada macluumaadkaas. Magaalada Seattle, waxaa naga go'an inaan ilaalino sirtaada, waxaanan hubin doonaa in wixii shaacin ah loo sameeyo si waafaqsan sharciga.
Si aad u ogaato macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo maareeyo xogtan, fadlan eeg Bayaanka Qarsooninimada ee Magaalada Seattle.

1. **Maxay tahay ujeedada deeqdiisu?**

   Ujeeddada deeqdan ayaa ah in taageero dhaqaale iyo aqoonsi la siiyo barayaasha waxbarashada carruurnimada hore iyo shaqaalaha daryeelka carruurta ee ka shaqaynayay barnaamijyada daryeelka carruurta ee ku yaalla Magaalada Seattle.

   Magaalada Seattle waxay ilaa **$2.5 milyan**, u qoondaysay Qoysaska, Waxbarashada, Preschool-ka, iyo canshuurta Promise (FEPP) taas oo ah lacag-bixinno la siinayo shaqaalaha u qalma ee ka shaqeeya xarumaha daryeelka carruurta qoyska (FCCs) iyo barnaamijyada xarumaha ku salaysan ee shatiga ka haysta Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF). Lacagaha deeqdan waxaa keliya oo la siin doonaa barnaamijyada ku yaalla gudaha xuduudaha magaalada Seattle.

   Waaxda Waxbarashada iyo Barashada Carruurnimada Hore ee Seattle (DEEL) iyo Adeegyada Barashada Hore ee BrightSpark ayaa iska kaashanaya bixinta iyo qaybinta lacagahan.

2. **Yaa u qalma inuu codsado Bixinta Lacagaha Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ee Seattle?**

   Codsiga lacagahan waa in uu soo gudbiyaa loo shaqeeyuhu. Xaaladda bixiyayaasha daryeelka ilmaha qoyska, kani waa qofka shatiga haysta. Ganacsiyada hela lacagahan ayaa mas'uul ka noqon doona inay u gudbiyaan shaqaalahooda.

   **Sharaxaada shaqaalaha u qalma:**
   Dhammaan shaqaalaha daryeelka carruurta ee ka shaqeeya goobta xarunta daryeelka carruurta ee shatiga haysta ee DCYF ama barnaamijka daryeelka carruurta qoyska ee ku yaal xuduudaha magaalada Seattle, iyadoon loo eegin xaaladda shaqada waqtiga-buuxa ah ama wakhtiga-

dhiman, waxay xaq u leeyihiin Lacagtan Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ee Seattle marka dhammaan shuruudaha hoose la buuxiyo

Shuruudo Dheeraad ah...

- Qofka shaqaalaha ah waa in uu ahaa shaqaale ka tirsan barnaamijka **Sabteembar 7, 2026** ama ka hor, iyo wakhtiga codsiga la soo gudbiyay wuxuuna sii wadi doonaa inuu u shaqeeyo barnaamijka daryeelka ilmaha ee xaqa u leh.
- Qofku wali waa shaqaale ka tirsan barnaamijka daryeelka ilmaha ee u-qalma wakhtiga uu soo gudbinayo codsiga iyo waqtiga uu barnaamijku helayo Bixinta Lacagaha Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ee Seattle, iyo marka barnaamijku siinayo lacagtan shaqaalahooda u qalma.
- Qofka shaqaalaha ah waa inuu ka shaqeeyaa goobta, siiyaa daryeel toos ah carruurta, oo uu u adeegaa ama la shaqeeyaa carruurta inta badan waqtiga shaqadooda. Marka lagu daro macalimiinta fasalka, kaaliyeyaasha macalimiinta, iyo shaqaalaha waxbarida ee daboolaya fasallo badan, xubnaha shaqaalaha ee doorarka kale sida diyaarinta cuntada barnaamijka daryeelka ilmaha, gaadiidka carruurta ee ku qoran barnaamijka xanaanada carruurta, ama shaqaalaha maamulka ee taageera barnaamijka ayaa laga yaabaa in loo tixgeliyo u-qalmitaanka ilaa inta ay Goobta ka shaqaynayaan, waa shaqaale ka tirsan barnaamijka daryeelka ilmaha, waxayna buuxiyeen shuruudaha kale ee u-qalmitaanka. Doorarkaan dhamaantood *waxay u adeegaan* barnaamijka waxayna suurtal galiyaan hawl galkiisa.
- Ilaa iyo inta uu shaqaaluhu ka shaqaynayo xarun daryeel ilmo oo ku taal xudduudaha magaalada Seattle, iyaga laftoodu uma baahna inay deganaadan Seattle. Shaqaale kasta oo buuxiya shuruudaha, oo ku jira codsiga, waa inuu haystaa aqoonsiga STARS ee saxda ah.
- Barmaanijyada ka baxsan Seattle, Marka lagu daro aagagga ka tirsan King County, uma qalmaan fursadan deeq-lacageedka ah. Bixiyayaasha shatiga laga dhaafo ee ilmaha da'da dugsiga kaliya ee ka hawlgala xadka magaalada Seattle uma qalmaan. Daryeelayaasha Qoyska, Saaxiibka, iyo Deriska (FFN) uma qalmaan.

3. **Waxaan ahay bixiyaha xanaanada caruurta qoyska oo si toos ah ula shaqeeya carruurta xarunteyda ay shatiga siisay DCYF. Ma dalban karaa lacagtan aqoonsiga nafteyda?**

   Haa. Uma baahnid inaad haysato shaqaale la shaqaaleeyay. Haddii aad tahay bixiye FCC ah oo si toos ah ula shaqeeya carruurta ama *u adeega* carruurta sida lagu qeexay su'aasha #2 ee sare oo ganacsigaaga shatiga ka haysta DCYF uu ku yaallo gudaha xudduudaha Magaalada Seattle, waxaad isku tirin kartaa inaad tahay shaqaale u qalma. Fadlan ogow, barnaamijka xanaanada cunugga qoyskaaga waa inuu lahaadaa shatiga DCYF oo furan ilaa **Sabteembar 7, 2026**, si loo buuxiyo shuruudaha " shaqaaleysiinta" ee lagu qeexay #2 ee kore.

4. **Markaan ahay daryeele ilmo qoys oo shati leh ama bixiye xarun ku saleysan, miyay tahay inaan iminka furnahay oo aan u adeego carruurta si aan ugu qalmo deeqdan?**

   Waa inaad hadda ahaataa mid furan oo carruur aqbala. Barnaamijkaaga waa in laga diiwaan gashan yahay oo uu u adeegay ugu yaraan hal ilmo 2026.

5. **Maxay tahay lacagta hayntu (tusaale, deeqda) caddadka (tirsiga)?**

Shaqaale kasta oo xannaano carruur leh oo la go'aamiyo inuu u qalmo wuxuu heli doonaa qadar isku mid ah. Barmaanijyada **looma**ogola inay ka badiyaan mushaarka shaqaalaha xaqa u leh qaarka kale. Tan waxaa ku jira inaysan jirin wax farqi ah oo la ogol yahay shaqaalaha waqti-buuxa ah iyo kuwa waqti-dhiman, ama doorka barnaamijka dhexdiisa. Tirada guud ee qof kasta la siiyay waxay ku xirnaan doontaa tirada guud ee shaqaalaha u qalma ee uu cadeeyay codsaduhu.

**6. Maalgelintani ma tahay mid tartan ah? (Ma tahay sida loo kala hor codsaday haddii codsigayga marka hore la gudbiyo?)**

Maya. Lacag-bixintu maaha mid tartan ah. Dhamaan codsadayaasha buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka ee soo gudbiya dhamaadka xilliga codsiga waxaa loo tixgelin doonaa si isku mid ah.

**7. Miyaa la iiga baahan yahay inaan u adeego qoysaska helaya kabka gobolka ee Xiriirka Shaqada ee Daryeelka Ilmaha ama laygu diiwaan galiyo Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha (CCAP) si aan ugu qalmo?**

Maya. Bixiye xanaano cunug oo kasta oo haysta shatiga DCYF oo ku jira xadka magaalada Seattle wuu dalban karaa, haddii ay helaan ama yaysan helin kaalmooyinka Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha (CCAP).

**8. Ma in aan ka diiwaan gashan ahayba Early Achievers si aan xaq ugu yeesho?**

Maya. Tani maahan shuruud, mana la siin doono tixgelin dheeraad ah kuwa ka diiwaan gashan Early Achievers.

**9. Maxaa loo isticmaali karaa lacagahan?**

Lacagta waa in si toos ah loo siiyaa shaqaalaha xaqa u leh. Ujeeddada Bixinta Lacagaha Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ee
Seattle waa in taageero dhaqaale loo fidiyo shaqaalaha daryeelka carruurta.
Deeqdan looma qorsheyn in lagu bixiyo lacago loogu talagalay barnaamijka daryeelka carruurta l aftiisa.
Bixiyeyaasha adeegga waxaa laga doonayaa inay hayaan diiwaannada la xiriira sida loo isticmaal ay lacagahaan, ayna u soo gudbiyaan Magaalada Seattle haddii laga codsado.

Deeqdani wax xaddidaad ah ma leh oo ku saabsan sida shaqaalaha la siiyay ee xaqa u leh ay u isticmaali karaan lacagaha loo soo dhiibay. Shaqaalaha helaya lacagahan loogama baahna inay xafidaan diiwaanka sida ay u kharash gareeyaan Lacag bixinta Haysashada Shaqaalaha Daryeelka Ilmaha ee Seattle.

Si aad u hesho lacag, bixiyayaasha waa in, codsiga dhexdiisa, ay qiraan inay u isticmaalayaan lacagaha si waafaqsan Su'aalaha Badanaa LA-iswaydiiyo (FAQ) iyo wixii shuruudo dheeraad ah ee ku jira codsiga.

**10. Miyaan u baahanahay inaan soo gudbiyo rasiidyada ama diiwaanada la xiriira deeqdan?**

Barnaamijyada ayaa looga baahan yahay in ay xafidaan caddaymaha qaybinta lacagahan ee shaqaalaha xaqa u leh. Diiwaanadaan waxaa laga yaaba inay codsato Magaalada Seattle. Ilaa ay si gaar ah u codsato Magaalada Seattle, ma ahan wax shardi ah in la soo gudbiyo caddaynta lacag bixinta shaqaalaha.

11. **Ka warran cashuuraha iyo kharashyada la xiriira helitaanka lacagahan?**

    Lacagta deeqda waxaa loo tixgeliyaa dakhli. Ujeedooyinka canshuuraha, deeqaha (oo ay ku jirto Lacag-bixintan Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ee Seattle) waa in loola dhaqmo si la mid ah dakhliga kale ee uu helo ganacsigaaga.

    Bixiyeyaasha waxay haysan karaan ilaa 15% lacagaha loo qoondeeyay in lagu daboolo kharashaadka ganacsiga ee u gudbinta lacagahan shaqaalahooda wixii canshuur ah iyo/ama khidmadaha maamulka. Haraaga harey waa in si toos ah loogu gudbiyo shaqaalahaaga iyadoo loo marayo nidaamka mushahaar bixinta ee caadiga ah ee barnaamijkaaga. Lacag bixinta waa in aan lagu bixin kaadhadhka hadiyadda ama beddelka kale ee gudbinta mushaharka tooska ah. Fadlan la soco in haynta mushaar bixinta laga yaabaa in ay sii yareyso qaddarka lacag-siinta ugu dambeysa ee shaqaalaha gaarka ah.

    Tusaale ahaan, aan sheegno in hay'addaadu ay 20 qof ku sheegtay codsiga, oo aad heshay $5,000. Wakaaladaada waxaa loo ogolyahay inay dib u celiso ilaa 15% (tusaale ahaan, taasi waxay noqonaysaa $750) si'ay u daboosho wixii cashuur ah ama kharashaadka maamulka ee u gudbinta tan jeegaga mushaharka shaqaalahaaga. Tani waxay ka dhigan tahay in barnaamijka tusaalahan ku jira uu ku qasban yahay inuu u gudbiyo ugu yaraan $4,250 20 ka shaqaale ah, mid kasta wuxuu helayaa lacag isku mid ah ka hor inta aan laga jarin canshuurahooda iyo wax ka jaristooda.

    **Fadlan raadso talo lataliye cashuureed oo xirfad leh wixii ku saabsan saamaynta deeqdan ee ganacsigaaga gaarka ah.**

12. **Deeqaha ma loo bixin doonaa si buuxda?**

    Haa. Qaddarka deeqda oo dhan waxaa horay loo bixin doonaa marka codsiga la ansixiyo. Bixiyeyaasha adeegga waxaa lacagta loogu diri doonaa wareejin elektaroonig ah ama jeeg. Bixiyeyaasha adeegga ee aan hore lacag elektaroonig ah uga helin BrightSpark Early Learning Services waxaa la siin doonaa ikhtiyaarka ay ku oggolaanayaan in lacagta loogu diro habkan. Cod sadayaashu waxay filan karaan inay helaan ogeysiis ku saabsan xaaladda deeqda qiyaastii hal bil kadib marka ay gudbiyaan codsigooda.

13. **Goorma ayay tahay inaan lacagtan u gudbiyo shaqaalahayga?**

    Bixinta lacagaha shaqaalaha daryeelka carruurta ee Seattle — iyada oo la adeegsanayo nidaamka caadiga ah ee bixinta mushaharka ee barnaamijkaaga — waa in la dhammaystiro labada xilli ee xiga ee bixinta mushaharka, ka dib marka bixiyaha adeeggu uu helo lacagaha.

14. **Ka warran haddii aan ahay hay'ad leh goobo badan oo xannaano carruur oo shati leh oo ku taal Seattle, ma u baahanahay in aan u soo gudbiyo codsi gooni u ah goob kasta?**

    Haa. Barnaamijyadu waxay liis garayn doonaan magacooda ganacsi iyo Lambarka# aqoonsiga ay bixisay DCYF oo qayb ka ah codsiga.  Codsi kastaa waa inuu lahaadaa lambar aqoonsi oo DCYF ay bixisay oo gaar ah.

15. **Waa maxay dukumeentiyada aan u baahanahay inaan soo gudbiyo?**

Ogeysiiska abaalmarinta ka dib, waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso W-9 oo dhammaystiran oo saxiixan iyo nuqul ka mid ah shatiga daryeelka ilmaha ee DCYF ee barnaamijkaaga. BrightSpark waxay ogeysiin doontaa codsadayaasha haddii dukumeentiyadani ay hore ugu jireen faylka, ama haddii ay tahay in si gaar ah loo soo raaciyo codsiga deeqdan.

Heshiis ku xiran ayaa lagu dari doonaa codsiga deeqda. Codsadayaashu waa inay doortaan "haa, waan ogolahay" ama luqad kasta oo xaqiijin ah oo ka muuqata foomka codsiga.

**16. Maxaan u baahanahay inaan sameeyo haddii aan rabo in Bixinta Lacagaha Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ee Seattle lagu soo diro bangigayga si elektaroonig ah?**

Ma aha wax shuruud ah, mana jirto wax door ah oo la siiyay barnaamijyada doorta inay lacag ku qaataan si elektaroonik ah.

Barnaamijyada doonaya inay helaan lacag-bixinno elegtaroonig ah balse aan weli heshiis lacag-bixineed oo elegtaroonig ah la yeelan BrightSpark waa inay soo gudbiyaan foom ogolaanshaha deebaajiga tooska ah oo dhammaystiran oo ay la socdaan jeeg madhan ama warqad bangigooda ka soo baxday oo xaqiijinaya xisaabtooda (account) iyo lambarrada marinka (routing number). Barnaamijyada aan lahayn oggolaanshaha deebaajiga tooska ah ee loo baahan yahay iyo dukumeenti bangi oo ku jira galka BrightSpark waxay lacagahooda ku heli doonaan jeeg warqad ah beddelkeeda.

**17. Sideen u codsadaa?**

Codsiga waxaa loo qorsheeyay inuu diyaar ahaado **Sabteembar 7-30, 2026**. Xiriirinta codsiga waxaa soo dhejin doonta Magaalada Seattle waxaana lagu daabici doonaa iimayl ay soo dirtay BrightSpark.  Bixiyeyaasha waxay sidoo kale ku codsan karaan codsiga qaab pdf ah waxayna u diri karaan ciwaanka iimaylkan grants@brightspark.org. Codsiga waxaa lagu heli doonaa luqadaha soo socda: Amxaari, Carabi, Ingiriis, Shiine la fududeeyay, Oromo, Soomaali, Isbaanish, iyo Fiyatnaamiis.

Shuruudaha Aqoonsiga STARS: Codsadayaashu waa inay haystaan aqoonsiga STARS oo ansax ah si ay u dhammaystiraan codsiga. Fadlan hubi in xubin kasta oo shaqaale ah oo u qalma uu leeyahay aqoonsiga STARS oo ansax ah ka hor intaadan soo gudbin codsigaaga. Codsiyada lama farsamayn karo iyada oo aan la helin aqoonsiga STARS ee shaqaalaha u qalma.

**18. Ma jirtaa wakhti kama dambays ah oo lagu codsanayo deeqdan?**

Haa. Waqtiga ugu dambeeya ee lagu codsanayo waa **Sabteembar 30, 2026, Saacadda 11:59 p.m. Pacific Daylight Time**.

**19. Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo caawimaad si aan u buuxiyo codsiga?**

Haddii aad ku qorantahay Early Achievers, waxaad kala xiriiri kartaa Tababarahaaga Barashada Hore caawimo. Haddii aadan ku qornayn Early Achievers ama aadan aqoonin tababarahaaga, fadlan la xiriir Khadka Bixiyaha BrightSpark 1-800-446-1114, oo dooro doorashada 2. Su'aalaha kale waxaa sidoo kale lagu soo hagaajin karaa shaqaala ha BrightSpark iimaylka grants@brightspark.org.

20. **Sidee iyo goormaan helaya ogeysiis haddii la igu abaalmariyo lacago ka mid ah Bixinta Lacagaha Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ee Seattle?**

Dhammaan bixiyayaasha codsaday waxaa lagula socodsiin doonaa xaaladda deeqdooda iimaylka.
Ku dhawaaqida deeqda wuxuu ku dhex jiri doonaa qaddarka lacagta iyo tirada shaqaalaha u qalma.
Codsadayaashu waxay ku xisaabtami karaan inay helaan ogeysiiska xaaladda deeqda qiyaastii hal bil ka dib marka ay soo gudbiyaan araajidooda. Waqtiga ugu dambeeya ee lagu codsanayo waa **Sabteembar 30, 2026, Saacadda 11:59 p.m. Pacific Daylight Time**.

21. **Maxaa dhacaya haddii shaqaale ka tago barnaamijkayga ka dib markii codsiga la gudbiyay?**

Haddii shaqaalaha lagu tiriyaa inay u qalmaan codsiga aanay hadda ka shaqaynayn goobtaada daryeelka ilmaha, oo tani ay u dhiganto 25% ama ka yar tirada shaqaalaha aad u aqoonsatay inay u qalmaan, barnaamijku waa inuu ugu qaybiya, si isku mid ah, qadarka deeqda haysashada shaqaalaha Daryeelka Ilmaha oo dhan shaqaalaha u-qalma ee hadda shaqeeya. Fadlan ogow, si aad xaq ugu yeelato, xubinta shaqaaluhu waa inuu buuxiyaa dhamaan shuruudaha u-qalmitaanka ee su'aasha #2 ee sare, oo ay ku jirto in la shaqaaleysiiyay **Sabteembar 7, 2026** ama ka hor.

Haddii in ka badan 25% xubnaha shaqaalaha lagu soo sheegay inay xaq u leeyihiin codsiga, oo aanay hadda ka shaqayn barnaamijkaaga, lacagta lagugu abaalmariyey waxay u baahan doontaa in dib loo xisaabiyo oo waa inaad la xiriirtaa grants@brightspark.org.